

Qofka Da'da Yar iyo Waalidkoow /ama Daryeelow,

Barnaamijka sare u qaadidda dadka jira dhowr iyo tobanka sano iyo tallaalka manajaytiska ee loogu tala galay dadka da' yarta ah

Maadaama uu qeyb ka yahay barnaamijka tallaalka ee qaranka, shaqaalaha Laanteena Tallaalka Bulshada ayaa waxay siinayaan dhammaan dadka da' yarta ah ee kujira sannad dugsiyeedka 9aad (ee jira da'da 13 ilaa 14 sano) 3da-kujira-1 ee sare u qaada dadka jira dhowr iyo toban sano iyo tallaallada maanajaytiska. Tallaalladaan sida joogtada ah loo bixiyo waxay xaqiijiyaan badbaadin sii socota oo ka dhan ah teetano, gawracato, dabaysha (Td/IPV) waxayna bixiyaan badbaado ka dhan ah maanajaytis noocyada ACW iyo Y. Waxaa muhiim ah in la qaato tallaallada da'daan inta la jiro maadaama laga helo badbaadada ugu wacan inta dhowr iyo toban jirka la yahay iyo kadib.



**Haa, waan doonayaa
inaan qaato tallaallada**



**Maya, ma doonayo inaan
qaato tallaallada**

**Waxaad ogolaan kartaa inaad qaadato
mid ama labada tallaalka.**

**MID KASTA OO AAD GO'AANSATO,
WAA INAAD NA SOO OGEYSIISO.**

- Buuxi foomka ogolaanshaha ah ee INTERNETK kujira adoo galaya: <https://www.leicsandrutlandimms.co.uk/>
- Xulo Gawracato, Teetano & Dabayl (Td/IPV), Bakteeriyada keenta Manajaytiska ee *Meningococcal* ACWY (Sannadka 9aad oo qura)
- Waxaad u baahan doontaa furaha ama *code* ka iskoolkaaga.
- Iskoolkaaga **Winstanley School** furaha ama *code* ka loogu tala galay waa **LE143844**
- Waxaad heli doontaa xog xaqiijin ah oo email kuugu soo dhici doonta markii foomka la gudbiyo.

*Ama waxaad iskaan gareyn
kartaa furahaan QR adoo
isticmaalaya taleefankaaga
xarragada ee smartphone
ka kaameradiisa si aad si
toos ah ugu hesho foomka
ogolaanshaha*



Talada ugu sarreysa: Xaqiiji in cinwaankaan emailku uu sax yahay uusana lahayn meel bannaan ama *isbays* ama calaamd joogsi ah, ama hakad iwm ka hor iyo kadib cinwaanka emailka iyo *code* ka iskoolkaba.

Waa inaad si buuxda u buuxiso foomka ogolaanshaha durba markii aad hesho warqadaan.

Waxaad wax ka baddali kartaa go'aankaagii waqtigii aad doontaba.

Waxaan u xirnaa si ku meel gaar ah nidaamka maalinta ka horreysa tallaalka si aan u helno waqti aan ku diyaar garowno. Nidaamka waa la furi doonaa mar kale durba tallaalka kadib.

Haddii aadan ku buuxin karin internetka, fadlan naga soo wac 0300 300 0007 si aad u codsato taageero. Mid ka mid ah kooxda ayaa laga yaabaa inuu ku soo waco si uu kuugu buuxsho foomka.

Tallaallada waxaa lagu bixiyaa labo cirbadood oo kala duwan oo lagu mudo gacanta dhankeeda sare. Tallaallada loo isticmaalo sare u qaadidda dadka jira dhowr iyo tobanka iyo barnaamijka tallaalka maanajaytiska **kuma jiraan gelatine ama aalkolo**.

Si aad u aqrido xogta ku saabsan bukaanka ee tallaalka sare loogu qaado dhowr iyo toban jirka iyo tallaallada manajaytis, gal: www.tiny.cc/boosterleaflet Si aad u hesho xogta barnaamijka qaran ee tallaalka, gal: www.nhs.uk/conditions/vaccinations

Dadka da'da yar waxay ka heli karaan xog badan oo ku saabsan tallaallada iyo arrimo kale oo caafimaad bartaan: www.healthforteens.co.uk/health/immunisation

Kooxdu waxay bixisaa tallaallo lagu qaato iskoollada. Waxaan aad ula shaqeynaa dhammaan maamullada iskoollada si loo xaqiijiyo in la qaado dhammaan tillaabooyinka munaasabka ah ee looga badbaadayo Covid si loo xaqiijiyo in tallaalka dadka loo gaarsiyo si badbaado leh.

Haddii xubin qoyskiina ka tirsan oo aad la nooshahay uu gooni dadka isaga soocay si xanuun looga badbaado ama haddii aad adigu isku aragto wax calaamado ah oo hoos lagu liis gareeyay maalinta tallaalka la qaadanayo **fadlan adigu ha ka qeyb qaadan**.

- **Heer kul sare– kul ayaad dareemaysaa markii xabadka ama dhabarka lagaa taabto**
- **Qufac aan kala go' lahayn oo cusub – tani macnaheedu waa inaad bilowday qufac ku celcelis ah.**
- **Urka ama dhadhanka oo isbaddala ama luma– tan macnaheedu waa waxaad ogaatay inaad wax urinayn ama aysan kuu dhadhamayn, ama ay waxyaabuhu kuugu soo uraan ama kuugu soo dhadhamaan si ka duwan sida caadiga ah.**

Haddii aadan joogin hal maalin, fursad dheeraad ah ayaa lagu siin doonaa tallaalka. Fadlan xasuusnow in tallaalkaan uusan u bixin doonin si joogto ah GP gaagu.

Waxaan aqoonsanaa in fursad baddal ah loo baahdo in la bixiyo haddii aadan awoodin in si buuxda aad iskoollada ugu qaadato tallaalka oo dhan. Adeegga ayaa xaqiijin doona in si buuxda laguugu war galiyo haddii sidaasi ay dhacdo.

Haddii aad soo qaadatay tallaalka teetanada, gawracato ama dabyil (Td/IPV) 5tii sano ee lasoo dhaafay waxaa laga yaabaa inaad u baahan tallaalka ilaa waa dambe laga gaaro laakiin waxaad wali u baahan tahay inaad qaadato tallaalka manajaytis. Qof kastoo da' yar

waxaa lagu samayn doonaa qiimeyn si loo ogaado sida uu munaasab ugu yahay. Haddii aad awoodo sidoo kale inaad qaadata tallaalka HPV isla waqtigaa ayaa lagu siin karaa mana ahan dhib inaad saddexda tallaalka isku mar qaadata.


Tallaalka kadib xog ka dambeysa tallaalka ayaa email laguugu soo diri doonaa taasi oo ka socota Laanta Tallaalka Bulshada xogta ku saabsan dadka da' yarta ah ee kujirta rikoorka caafimaadka ee NHS iyana waa la cusbooneysiin doonaa.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad jeclaan lahayd inaad hesho talo ku saabsan wixii taageero ah oo dheeraad ah ee loo baahan karo inta tallaalku socdo la soo xiriir kooxda oo kasoo wac: 0300 300 0007 (xulo 1 intaasi kadibna 4 deedna 2) ama usoo dir e-mail: communityimms@leicspart.nhs.uk Wicitaannada ama koolasha ayaa aad u badan waqtigaas aanu bixinayno tallaalka waxaadna ku qasbanaan kartaa inaad sugto waqtiga ay iska dhimayaan si lagaaga qabto. Sidoo kale waxaad duubi kartaa farriin cod ah annaga ayaana hadhoow adiga ku soo wici doona.

Mahadsanid,



Dr Tim Davies
Lataliyaha ugu Sarreeya ee
Baaritaannada iyo Tallaalka
NHS England iyo Horumarinta NHS –
Midlands



Suzanne Leatherland
Maareeyaha Laanta Tallaalka
Leicestershire Partnership NHS Trust

XOG KU SAABSAN BUUXINTA FOOMKA OGOLAANSHA EE INTERNETKA KUJIRA

Gal: <https://www.leicsandrutlandimms.co.uk/Forms/DTP>

Gal oo xaqiiji cinwaanka emailkaaga

Gal code ka iskoolkaaga: LE143844 oo guji hel iskoolka. Waxaa soo baxaya magaca iskoolkaaga.

Talooyin sare:

- Si aad usoo hesho bogga waxaad sidoo kale internetka ka raadin kartaa “Leicester imms” macnaha tallaalka Leicester
- Xaqiiji in cinwaanka emailku uu saxan yahay oo isbaysyo uusan lahayn ama calaamadda joogsiga ama hakad iwm oo ka horreeya ama ka dambeeya cinwaanka emailka iyo code ka iskoolka.

QEYBTA 1: Xogta Bukaanka iyo Faahfaahinta Cinwaanka

Fadlan kusoo dar nambarka cunugaaga ee NHS, haddii la heli karo

Haddii aad ka diiwaan gashan tahay GP nambarkaasi waanba haynaa. Waxaa uu ka kooban yahay 10 jifir oo gaar u ah qof walba waxaana laga heli karaa oo uu ku dhigan yahay kaarkiisa caafimaadka. Sidoo kale waxaa laga soo heli karaa warqad kasta oo ka timid NHS, wixii daawo ah ee lasoo qoray ee ku taal buugga cas ee cunugga – “rikoorka caafimaadka cunugeyga”.

QEYBTA 2: Caddeynta Ogolaanshaha

Buuxi taa si aad u bixiso ogolaansho ku saabsan tallaalka hargabka.

QEYBTA 3: Taariikhda Qofka ee Caafimaadka

Ka jawaab su'aalaha la xiriira taariikhda tallaalkii aad horay usoo qaadatay iyo wixii taageero ah ee aad u baahan tahay inta uu tallaalkaan socdo.

Qofka da' yarta ah waxaa laga yaabaa inuu awoodo inuu ogolaansho iska bixiyo si uu u qaato tallaalkaan adigoon ku raacin adigu oo xirfadleyaasha caafimaadka ayaa qiimeyn ku

samayn doona qofka da' yarta ah awoodiisa uu ku qaadanayo go'aan kadib markii xog buuxda uu helo.

Wadaagidda xogta: Kadib markii lagu qaato tallaalka iskoorka, ogeysiis ayaa la bixin doonaa oo xog ayaa lagu dari doonaa rikoorka caafimaadka ee cunugaaga ee NHS.

Si aad u hesho taageero ah xog caafimaad oo ku qoran luuqado kale, fadlan booqo bartaan: <https://www.nhs.uk/about-us/health-information-in-other-languages/>